



UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN

Maanta oo ay taariikhdu tahay **08/03/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

ISKA IIBIYAHA AHNA WAK/DHAXALTOOYADA:-
MAXAMUUD JAAMAC GEEDDI JIMCAALE,
Hooyo: Madiino Cali Cilmi, Somali ah, Ku Dhashay:
Hobyo, Sanadkii: 1956, Degan Muqdisho, Sita:
W.A.L., Lr. N0000058532

IIBSADE:- ABDIMAHAD MOHAMUD WEHELIYE
, Hooyo: Maryan Barre Maxamed, Somali ah, Ku
Dhashay: G/kacyo, Sanadkii: 1974, Degan Muqdisho,
Sita: Somali Passport, Lr. P01041048

TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Gobolka Mudug**, Degmada:
(G/kacyo (Xaafada H/wadaag), Cabirka: **(20X20)-M**,
W.M.L: **(GLK0865/2012)**, Tr. 21/07/2012, Kana Soo
Baxay Nootaayo G/kacyo, Uuna Saxiixay Khaliif Cabdi
Maxamed

SOOHDINTA DHULKA

Bari: Waxaa Ka Mara Waddo, Koonfur: Waxaa Ka Xiga
Maxamed Dhooteeye, Galbeed: Waxaa Ka Xiga
Maxamuud Jaamac, Waqooyi: Waxaa Ka mara Wado
QIIMAHA DHULKA: USD \$8,000 (Siddeed Kun oo
Doolarka Mareykanka ah).

B- Aniga oo ah **MAXAMUUD JAAMAC GEEDDI JIMCAALE**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyay **ABDIMAHAD MOHAMUD WEHELIYE** Dhul banaan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yahay, uuna ku qoran yahay **Marxuum Cabdi Jaamac Geedi**, Kuna gaday Warqada **Dhaxalkoob, Qayim iyo Wakaalad Ref:- MDWAD/371/23, Tr. 06/03/2023**, Kana soo baxday Maxkamada Degmada Wadajir, ayna Saxiixeen Kaaliye C/risaaq Cali Cabdi (Caabi) iyo Dr. Maxamed C/laahi Yuusuf, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskaan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan u Qaaday Marxuum Cabdi Jaamac Geedi Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Aniga oo ah **ABDIMAHAD MOHAMUD WEHELIYE** Ahna iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkiyada Dhulkaan Kuna qancay heshiiskaan.

J- Anaga oo Kala ah **C/qaadir Axmed Maxamed & Maxamed Cabdi Maxamed** Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecaan.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA AHNA WAK/DHAXALTOOYADA

MAXAMUUD JAAMAC GEEDDI JIMCAALE

MAHAMUD

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- C/QAADIR AXMED MAXAMED

SAXIIXA IIBSADAHHA DHULKA

ABDIMAHAD MOHAMUD WEHELIYE

2- MAXAMED CABDI MAXAMED

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 605/T.P.N/23, Tr. 08/03/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Maxamuud Jaamac Geeddi Jimcaale Ahna (Wakiilka Iska iibiyaha)**, **2- ABDIMAHAD MOHAMUD WEHELIYE Ahna (Iibsade)** iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Naqul.

By: Sayid



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

Maxamed C/laahi Maxamed

MASAWIRKA ISKA IIBIYIHA

Maxamuud Jaamac Geedi Jimcaale



MASAWIRKA IIBSADAHA

AbdiMahad Mohamuud Weheliye



MARKHAATIYAASHA

1-C/qaadir Axmed Maxamed



2-Maxamed Cabdi Maxamed



[Handwritten signature]



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC




WARQADDA AQQONSIGA

البطاقة الشخصية

IDENTITY CARD

N0000058532



Magaca / الإسم / Name

MOHAMUD
JAMA
GEDI



Taariikhda dhalashada / تاريخ الميلاد / Date of Birth

31 DEC 1956

Meesha dhalashada / مكان الميلاد / Place of Birth

HOBYO

Taariikhda la bixiyay / تاريخ لإصدار / Date of Issue

02 OCT 2007

Lab/Dheddig / الجنس / Gender

MALE



Xaafiiska Nootaayada Gaalkacyo

Tel: 857941 / 794346 / 795538/660523

Ref. GLK0865/2012

Date: 21/07/2012

UJEEEDO: HESHIIS HIBEYN DHUL

Anigoo ah Faadumo Jaamac Geedi, Hooyadayna layiraahdo caasho warsame , ku dhashay Galkacyo Da,daydun tahay 70jir Degan Galkacyo waxaan qoraalkan ku caddeynayaa in aan uhibeeyay kuna wareejiyey Cabdi Jaamac Geeddi , dhulka ku yaala Galkacyo xaafada howlwadaag soonaha suuqa calanley Cabirkiisu dhan yahay 20x20 mitir, Soohdimihiisuna ay kala yihiin:-

Bari:-	waxaa ka xiga	wado
Waqooyi:-	waxaa ka xiga	wado
Galbeed:-	waxaa ka xiga	maxamuud jamac
Koonfur:-	waxaa ka xiga	maxamed dhoteye

Sidaas daraadeed waxaan mar labaad caddaynayaa in aan uhibeeyay kuna wareejiyay cabdi jaamac geedi dhulka kuyaala xaafada howlwadaag

Sidoo kale anigo ah Cabdi Jaamac Geeddi , hooyadeyna layiraahdo caasho warsame , ku dhashay Galkacyo Da,daydu tahay 60jir degan muqdisho Waxaan qoraalka kucadeynayaa in aan ka gudomay kalana wareegay dhulkaas kor lagu soo sheegay .

SAXIIXA HIBEEYAHA
Faadumo Jaamac Geedi

SAXIIXA LOO HIBEEYAHA
Cabdi Jaamac Geeddi



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1. C/nafac maxamed cabdi



2. Sahro Cisman Samatar



CADDAYNTA NOOTAAYADA

Anigoo ah Khaliif Cabdi Max'ed ahna Nootaayaha Galkacyo waxaan qoraalkan ku caddaynayaa in saxiixyada kor ku qorani yihiin kuwii saxda ahaa 1 Faadumo Jaamac Geedi, ahna HIBEEYAHA Cabdi Jaamac Geeddi , ahna UHIBEEYAHA iyo marqaatiyaasha kor ku saxiixan.

Waxaana saxiixyadaan Nootaaya – ahaan goob jog iiga ahaa MAH'UD ABDI ISSE waana HIBEYN ansax ah oo waafaqsan sharciga islaamka iyo qaanuunka madaniga ah ee dalka u degsan, waana laga wada saxiixay diiwaanka Nootaayada labada dhinac ee wax kala gadatay iyo marqaatiyaashaba.



Beel

R. 605/T.P.N/23

v. 08/03/23

20x20m



Lam: SOMEMB/FR/WAK/60/23
Ujeedo : WAKAALAD GUUD

L. 492/2023

Waa la hubiyay
02/03/2023

Waxaa maanta oo taariikhdu tahay 20-02-2023 uu noo soo gudbiyey xafiiska Daryeel Association ee ay xaruntiisu tahay dalka Sweden, xogta xubnaha magacyadooda hoos ku qoran yihiin:-

1. **Faadumo Cabdulqaadir Axmed**, ina Sahra Sh. Nuur Xasan, dhalatay 02.11.1986kii, lehna baasaboor L.SA0011371-Sweden, ahna xaaska marxuumka Cabdi Jaamac Geedi.
2. **Caasho Cabdi Jaamac Geedi** ina Faadumo Cabdulqaadir Axmed, dhalatay 12.01.2011kii, lehna baasaboor L. AA0609175-Sweden, uguna qoran yahay magaca ah Asha Jama Ghedi, Waxaana magaceeda u saxiixaya hooyadeed Faadumo Cabdulqaadir Axmed, maadaama aysan qaan gaarin.
3. **Saara Cabdi Jaamac Geedi**, ina Faadumo Cabdulqaadir Axmed, dhalatay 29.09.2012kii, lehna baasaboor L. AA0609199-Sweden, uguna qoran yahay magaca Zara Jama Ghedi, Waxaana magaceeda u saxiixaya hooyadeed Faadumo Cabdulqaadir Axmed, maadaama aysan qaan gaarin.
4. **Axmed Cabdi Jaamac Geedi**, ina Faadumo Cabdulqaadir Axmed, dhashay 28.12.2014kii, lehna baasaboor L. AA0609183-Sweden, uguna qoran yahay magaca ah, Ahmed Jama Ghedi, Waxaana magaceeda u saxiixaya hooyadeed Faadumo Cabdulqaadir Axmed, maadaama uusan qaan gaarin.

Ka dib markii ay Safaaradda Soomaaliya ee France dib u hubisay xogta xubnahaas, waxa uu caddeynayaa macluumaadka hoos ku xusan:

QIRAALKA WAKAALAD BIXIYAASHA

Aniga oo ah **Faadumo Cabdulqaadir Axmed**, xaaska marxuumka **Cabdi Jaamac Geedi**, maskaxdeyduna taam tahay, cid i qasabtana aysan jirin, isla markaana ay joogaan labo marqaati. Waxaan qoraalkaan ku caddeynaynaa:

- In aan marxuumka **Cabdi Jaamac Geedi** u dhalay carruurta xogtoda kor ku xusan kalana ah: **Caasho Cabdi Jaamac, Saara Cabdi Jaamac iyo Axmed Cabdi Jaamac.**
- In aan Wakaalad Guud Siiyey **Maxamuud Jaamac Geedi**, dhashay 31.12.1956kii, lehna warqadda aqoonsiga L. N0000058532-Soomaaliya. Waxaana u wakiishay, Anigoo mas'uul ka ah nafteyda iyo ilmaheyga kor ku xusan:- in uu Dhaxalkoob u sameyn Karo geerida marxuumka Cabdi Jaamac Geedi oo ku geeriyooday dalka Sweden sanadkii 2019kii, inuu Gadi Karo, Wareejin Karo, Qayb dhaxleedka aan ku leeyahay dhammaan hantida ma guurtada ah iyo tan guurtada ah ee aan dhaxalka uga helnay marxuumka Cabdi Jaamac Geedi.
- Sidoo kale Waxaan Caddeynayaa in ilmaha aan Marxuumka u dhalay uu Qayim iyo Masuulba ka yahay Adeerkood **Maxamuud Jaamac Geedi**.

Sidaas kor ku xusan ayaan wakaalad ku siiyay **Maxamuud Jaamac Geedi** inuu ii fuliyo wuuna iga aqbalay wakiilashadaan. Sidaas ayaan ku caddeynayaa qoraalkeygaan.





Lam: SOMEMB/FR/WAK/060/23

Saxiixa Markhaatiyaasha

Abdullahi
.....
Cabdullaahi Maxamuud Maxamed

Abshir
.....
Abshir Abdille Barkhadle

Magaca iyo saxiixa wakaalad bixiyaasha

1. Faadumo Cabdulqaadir Axmed..... *Fatima*.....
2. Caasho Cabdi Jaamac Geedi */Fatima*.....
3. Saara Cabdi Jaamac Geedi..... */Fatima*.....
4. Axmed Cabdi Jaamac Geedi..... */Fatima*.....

Anigoo ah Ahmed Mohamud Hagi ALI, qonsulka Safaaradda Soomaliya ee France, waxaan maanta oo taariikhdu tahay 20/02/2023, halkaan ku xaqiijinayaa in macluumaadka kor ku qoran iyo saxiixa wakaalad bixiyaasha kor ku xusan ay sax yihiin. **F.G** : Warqaddaan ma aha caddeyn milkiyad ama caddeyn lahaansho hanti ee waa qoraal wakiilasho keliya.

Ahmed M. Hagi Ali (Ahmed Shire)
Qonsul Safaaradda Soomaliya-France



Somali Federal Republic Ministry of Foreign Affairs & International Co-operation	جمهورية الصومال الفيدرالية وزارة الشؤون الخارجية والتعاون الدولي
Signature and its seal AUTHENTICATED	توقيع وختم مؤتمنة
No.....
Date.....
Department of Consulate Affairs	إدارة شؤون القنصلية

Abshir
01/03/23

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC




WARQADDA AQQONSIGA

البطاقة الشخصية

IDENTITY CARD

N0000058532



Magaca / الإسم / Name

MOHAMUD
JAMA
GEDI



Taariikhda dhalashada / تاريخ الميلاد / Date of Birth

31 DEC 1956

Meesha dhalashada / مكان الميلاد / Place of Birth

HOBYO

Taariikhda la bixiyay / تاريخ إصدار / Date of Issue

02 OCT 2007

Lab/Dheddig / الجنس / Gender

MALE



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/371/2023

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, QAYIM IYO WAKAALAD

Maanta oo ay taariikhdu tahay 06/03/2023, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah: **1-C/qaadir Axmed Maxamed**, Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo, Sanadkii 1959, Ina Xabiibo Maxamed Cabdi sita Licen Lr:- 9231, Kana Soo Baxday Wasaarada Gaadiidka Ee D.F.Soomaaliya.

2-Maxamed Cabdi Maxamed, Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo, Sanadkii 1968, Ina Madiino Aadan Cabdi, sita WAI Lr:- 18494, Kana Soo Baxay Dowlada Hoose Ee Muqdisho.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu Geeriyooday Marxuum la oran jiray **Cabdi Jaamac Geedi**, kuna geeriyooday Sweden Sanadkii 2019, Labadiis waalid way ka geeri Horeeyeen, Wuxuuna ifka ugu tagay oo dhaxlaya, 1-Xaas, 2-Gabadhood iyo 1- Wiil, Waxayna Kala Yihiin Sidan Soo Socota:-

DADKA: -

1 Faadum	C/qaadir	Axmed	Degan Sweden	Dhalatay 1986	(Xaaskii Marxuumka)
2-Caasho	Cabdi Jaamac	Geedi	Degan Sweden	Dhalatay 2011	(Gabadhii Marxuumka)
3-Saara	Cabdi Jaamac	Geedi	Degan Sweden	Dhalatay 2012	(Gabadhii Marxuumka)
4-Axmed	Cabdi jaamac	Geedi	Degan Sweden	Dhashay 2014	(Wiilkii Marxuumka)

Sidoo kale labada Marag waxay Maxkamadda Horteeda ka caddeeyeen in aysan jirin cid kale oo dhaxlaysa marxuumka sare ku xusan oo nool ama dhintay ha ahaadaan asal ama farac.

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMKA.


Labada Marag Waxay Maxkamada Ka Hor cadeeyeen in Marxuum Cabdi Jaamac Geedi uu ifka ugu tagay 1-Dhul Ku Yaal **Muqdisho** Degmada **Hodan**, Cabirkiisuna yahay **20X30-M**, Looto Lr:**850-852**, Lehna Sabarlog:-B/B/34/3/2017, Tr:- 06/02/2017, Rasiid Lr:-141353, 05/02/2017, Kana Soo Baxay Dowlada Hoose Ee Muqdisho, 2-Dhul Ku Yaal Degmada Afgooye Gaar Ahaan Soona Jasiira Oo ah **16** Boos Midkiiba ah Cabiirkiisu **20X20-M**, Looto Lr:-**411,412,413,414, 438, 439, 440,441,462,463,464,465,484,485,486,487**, Lehna WML:- 117768/2012,Tr:-09/12/2012,Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr,Maxamuud Xaaji Jimcaale(Biil),3-Dhul Ku Yaal **G/kacyo** xaafada Howlwadaag Soona Suuqa Calanley Cabirkiisu Dhan Yahay **20X20-M**,Soohdimihiisuna Yahay Bari iyo Waqooyi **Jid**,Galbeed Waxaa Ka Xiga Maxamuud Jaamac, Koonfur Waxaa Ka Xiga Maxamed Dhoteye,Lehna WML:-GLK0865/2012,Tr:-21/07/2012,Kana Soo Baxay Nootaayo Gaalkacyo, Uuna Saxiixay Khaliif Cabdi Max'ed,4-Dhul Ku Yaal Degmada **Hobyo**, Cabirkiisuna Yahay **190X90-M**,Soohdimihiisuna Yahay Koonfur **Jid**,Bari Waxaa Ka Xiga Sh,Cali Bare, Waqooyi Waxaa Ka Xiga Jibriil, Galbeed Waxaa Ka Xiga Qabriga Shiiqow iyo Nabadoon Dhuxuloow.

WAKAALAD

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa in Dhaxaltoyada Kala ah **1-Faadumo C/qaadir Axmed**, Ahna Xaaskii Marxuumka ay Soo Wakiilatay **MAXAMUUD JAAMAC GEEDI**, Sida Ku Cad Wakaalad Guud Ref:-SOMEMB/FR/WAK/60/23,Tr:-20/02/2023,Kana Soo Baxday Safaarada Soomaaliya Ee Faransiiska, Uuna Saxiixay Qunsulka Safaarada Ahmed M,Hagi Ali(Ahmed Shire), Waxayna Wakaaladan Soona Martay Maxkamadda Racfaan Ee Gobolka Banaadir, Una Wakiilatay in uu u maamuli Karo, dhaxalkoob u samayn Karo, gadi Karo Wareejin Karo,Kireen Karo, kana Saari karo, Saxiixi Karo kaalintooda, una doodi Karo una dacwoon Karo oo qareen u qaban Karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karo dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUM CABDI JAAMAC GEEDI**.



1-C/QAADIR AXMED MAXAMED



2-MAXAMED CABDI MAXAMED



SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA AHNA QAYIM

MAXAMUUD JAAMAC GEEDI



Qayim

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa Dhaxaltooyada Kala Ah 1-Caashi Cabdi Jaamac Geedi Oo ah 12 Jir, 2-Saara Cabdi Jaamac Geedi Oo ah 11 Jir,3-Axmed Cabdi Jaamac Geedi Oo ah 9 Jir, Oo Aan Qaan gaar ahayn Uu Qayim U yahay Adeerkood **Maxamuud Jaamac Geedi**, Uuna awood buuxda u leeyahay ku tasarufka qeybta ay ku leeyihiin Hantida ay ka Dhaxleen **MARXUUM CABDI JAAMAC GEEDI**,Sida in uu iibin karo, Wareejin karo, Qaybtooda u qaadi karo.

DAMIINU MAAL

1- **C/qaadir Axmed Maxamed** ,2- **Maxamed Cabdi Maxamed** Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada iyo Wakaalada sare ku xusan.

1- C/QAADIR AXMED MAXAMED

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

2-MAXAMED CABDI MAXAMED

SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA AHNA QAYIM

MAXAMUUD JAAMAC GEEDI

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markeey Aragtay Dukumintiyada dhulka uu Marxuumka ku Qoran Yahay, markeey aragtay Wakaalada sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida **MARXUUM CABDI JAAMAC GEEDI**, oo ay Dhaxalkiisa leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, Waana Sugitaan Dhaxalkoob,Cadeyn Tariko, Qayim iyo Wakaalad ansax ah oo waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

C/Maxamed C/Ilaahi Yuusuf



Dawladda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Gaadiidka



Federal Republic of Somalia
Ministry of Transportation

Aqoonsiga Dereewalka | Driving License



[Handwritten signature]

L/Aqoonsiga - License No

9231

Magaca - Name

Abdulkadir Ahmed Mohamed

Wadajir - Nationality

Somali

Taariikhda Dhalashada - Date of Birth

01/01/1959

Meeraha laga Bixiyey - Place of Issue

Mogadishu

Heeska Gaadiidka - Vehicle Type

D

Taariikhda La Bixiyey - Issued Date

27/10/2021

Taariikhda uu Dhacay oo - Expiry Date

26/10/2024



DOWLADDA HOOSE
EE MUQDISHO



MUNICIPALITY
OF MOGADISHU

KAARKA AQOONSIGA

Lambar:
18494



Magaca.....: MAXAMED

Aabaha.....: CABDI

Awowga.....: MAXAMED

Naynaas.....: XAAJI

Goobta

Dhalashada: GAALKACYO

Sanadka.....: 01-Jan-1968



Shaqada..... GANACSADE

Astaan Gaar: MALAHAN

Hooyada: MADIINO AADAN CABDI

Dheerarka : 1.7

Taariikhda Labixiyey:

13-Mar-2018 12:00:00 AM

Duqa Magaalada:



Handwritten signature in blue ink



Aqoonsigan waxaa ogolaatay Dowladda Hoose ee Muqdisho. Qofkii hela
aqoonsigaan, fadlan guddoonsii xafiisyada Dowladda Hoose ee Muqdisho




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 13/03/2023

Aniga oo ah **Sayidcumar C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maxamed Cabdi Maxamed** oo ka Wakiil ah Iibsade **ABDIMAHAD MOHAMUD WEHELIYE** Dukumiintiga **Original+AATO** Beeca Dhulka ee **Rep No. 605/W.P.N/23, Tr. 08/03/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Iibsadaha	ABDIMAHAD MOHAMUD WEHELIYE
Cabirka	20X20
Ku Yaallo	Gobolka Mudug, Degmada G/kacyo (Xaafada H/wadaag
Lotto Lambar	
W.M.L	GLK0865/2012, Tr. 21/07/2012 Ka soo baxday Nootaayo G/kacyo
Taariikhda Beeca	08/03/2023
La Socoto	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

Wakiilka Iibsade: Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Maxamed**, Leh Tel No. **0618145585**, Degan **W/leey** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Dhulka faah faahintiisu Sare ku cadahay uuna leeyahay **ABDIMAHAD MOHAMUD WEHELIYE**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Sayidcumar C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maxamed Cabdi Maxamed